# Lambarka Bulshada ee Caruurta

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Waa maxay sababta aan lambar ugu sameynayo ilmahayga? | 1 |
| Ma waajib baa in ilmuhu yeesho Lambarka Bulshada? | 1 |
| Dhalashada | 2 |
| Da'da | 2 |
| Aqoonsiga | 3 |
| Maxaa dhacaya haddii ilmaha aan korsanayo? | 3 |
| Waa imisa kharashka aan bixinayo? | 3 |
| Maxaan yeelayaa haddii kaarku iga lumo? | 4 |
| Qalad U Isticmaalka lambarka Bulshada (SS) | 4 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 4 |


M arka caruur kuu dhalato, waxyaabaha aad ka fikireyso «in aad sameyso» waa helitaanka Lambarka Bulshada ee ilmahaaga. Xilliga ugu wanaagsan ee la sameyn karo sidan waa marka aad bixineyso macluumaadka shahaadada dhalashada ee ilmahaaga. Haddii aad sugto in aad ka codsato xafiiska Lambarka Bulshada, waxaa dhici karta in ay daahdo inta laga xaqiijinayo dhalashada ilmahaaga.

## Waa maxay sababta aan lambar ugu sameynayo ilmahayga?

Waxa lagaa doonayaa Lambarka Bulshada ee ilmahaaga si aad canshuurta ugu xareysato oo laguugu aqoonsado qof kula nool. Ilamahaagu waxa uu u baahanayaa lambarka haddii aad qorsheyneyso:

- In aad xisaab bangi u furto;
- IN aad u iibsio warqdaha keydka ee bangiyada;
- Aad u hesho ceymiska caafimaadka; ama
- Aad u codsato adeegga dawladda ee caruurta.

## Ma waajib baa in ilmuhu yeesho Lambarka Bulshada?

Maya. ILmaha dhasha oo loo sameeyo lambarka bulshada waa arrin aan qasab aheyn. Laakiin, in aad lambarka codsato marka ilmuhu dhasho waa fikrad wanaagsan. Waad u codsan kartaa Lambarka Bulshada ilmaha marka aad codsaneyso shahaadada dhalashada. Hay'adda dawladda ee soo saara shahaadada dhalashada

ayaa macluumaadka dhalashada ee ilmahaaga nala wadaagaya boostada ayaanan kuugu soo direynaa kaarka.

Haddii aad sugto in aad ka codsato xafiiska Lambarka Bulshada, waa in aad na tustaa dhalashada, da'da iyo aqoonsiga, iyo sidoo kale caddeyntaada. Waa in aan xaqiijinaa aqoonsiag dhalshada ilmaha, taasoo qaadan karta 12 todobaad in kaarka la idin soo diro. Si aan u xaqiijino shahaadada dhalashada, xafiiska Lambarka Bulshada waxa ay la xiriiryaan xafiiska soo saaray. Waxaanu sidaas u yeelnaa in aan ka hortagno in dadku adeegsadaan shahaado dhalsho been abuur ah ay ku helaan Lambarka Bulshada si ay u helaan aqoonsi been abuur ah.

### Sidee ayaan ku codsadaa?

**Xilliga aad joogto isbitaalka**: Marka aad bixineyso macluumaadka dhalashada ilmahaaga ee shahaadada dhalashada, waxaa lagu weydiinayaan haddii aad dooneyso in aad ilmahaaga u codsaneyso Lambarka Bulshada. Haddii aad tiraahdo «haa» waxaa lagaa doonayaa in aad tusto lambarka bulshada ee labada waalid haddii aad awoodaan. Xitaa haddii aadan garaneyn lambarka bulshada ee waalidka, weli waad u codsan kartaa lambarka ilmahaaga.

**Marka aad ka codsaneyso xafiiska**: Haddii aad sugto in aad codsato lambarka ilmahaaga, waa in aad:

- Buuxi Codsiga Kaarka Lambarka Bulshada (Foomka SS-5-INST-SO);
- Adiga oo keemaya warqadaha asalka ah ee ilmaha adiga oo caddeynaya:
  - —Dhalashada;
  - —Da'da; iyo
  - —Warqadda Aqoonsiga.
- Na tus caddeyn muujineysa aqoonsigaaga

***FIIRO GAAR AH:** Meelaha qaarkood, boostadu ma geyneyso kaarka ilmaha haddii aanu magaca ilmaha ku qorneyn sanduuqa boostada.*

Caruurta da'doodu tahay 12 ama ka weyn. Qof kasta oo da'diisu tahay ama ka weyn tahay 12 sano oo marka ugu horeysa codsanaya Lambarka Bulshada waa inuu yimaadaa xafiiska si loo wareysto, xitaa haddii uu waalidka u saxiixayo codsiga.

## Dhalashada

waxa aan ogolahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan heysashada dhalashada waddanka. Taas waxaa ka mid ah Shahaadada dhalashada Mareykanka, warbixinta qunsuliyadda ee dhalashada, baasaboodka Mareykanka, Shahaadada qaadashada dhalashada ama shahaadadada dhalashada. Dadka aan heysan dhalashada ha akhriyaan Lambarka Bulshada *ee Dadka aan Heyshan Dhalashada* (Daabacaadda 05-10096-SO) si ay uga helaan macluumaad dheeraad ah.

## Da'da

Haddii uu ilmahaagu ku dhashay Mareykanka, waxaa lagaa doonayaa in aad keento shahaada dhalshada ee ilmaha. (haddii aad heysato, waa waajib in aad keento) Haddii aadan heysan shaaahada dhalashada, waxaa laga yaabaa inaan ogolaano:

- Caddeyn xaga is diiwaan gelinta diinta oo la sameeyey intii aadan 5 sano jir noqon marka laga soo bilbaabo taariikhda dhalashada;
- Diiwaanka dhalashada ee cisbitaalka aad dhalatay ee Mareykanka; ama
- Baasaboor.

Haddii ilmahaagu ku dhashay meel ka baxsan Mareykanka, waxaa lagaa doonayaa in aad keento shahaadada dhalashada ee halka ilmuhu ku dahshay (haddii aad heysato shahaado ama aad 10 cisho gudahood ku heli karto shahaadada). Haddii aadan shahaadada heli karin, waxaa suurogal ah in aan ogolaano:

- Certificate of Birth Abroad (FS-545, Shahaadada dhalashada ee wadamada dibadda);



*(rogad)*

- Certificate of Report of Birth (DS-1350, Shahaado ay ku cadahay dhalashada);
- Consular Report of Birth (FS-240, Warbixinta Qunsuliyadda ee Dhalashada wadamada dibadda);
- Certificate of Naturalization (Shahaadada qaadashada Dhalashada Mareykanka); ama
- Baasaboor.

## Aqoonsiga

**Ilmahaaga**: Waxa aan ogolnahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan in lagugu aqoonsado. Aqoosniayadaas waa in ay noqdaan kuwo aan taariikhdoodu dhamaan (dhicin) magacaaga, waxyaabaha lagugu aqoonsan karo aniga oo doorbideyna sawir dhawaanta la qaaday. Guud ahaan waan ogolaanaa aqoonsi aan sawir laheyn haddii laga heli macluumaadk ku filan aqoonsiga ilmaha (sida magaca ilmaha iyo da'da, taariikhda dhalashada ama magaca waalidiinta). Waxaanu jecelnahay in aan aragno Baasaboorka Ilmaha. Haddii aan la heli karin aqoonsiyadaas, waan ogolnahay aqoonsiga ilmaha:

- Aqoonsiga gobolku bixiyo ee aan aheyn kan gaadiidka lagu wato.
- Amarka maxkamadda ee korsashada
- Diiwaanka dhakhtarka, isbitaalka ama bukaan socod eegtada;
- Diiwaanka xagga diinta;
- Diiwaanka dugsiga ama xanaanada caruurta; ama
- Aqoonsiga kaarka dusgiga;

**Adiga**: Haddii aad heysato dhalashada, Lambarka Bulshada waxa ay ku weydiisanayaan Ogolaashaha wadidda gaadiidka, aqoonsiga gobolka ee aan aheyn wadidda gaadiidka ama Baasaboorka Mareykanka aqoonsi ahaan. Haddii aadan heysan aqoonsiyadaas, waxaanu ku weydiisneynaa in aan aragno kuwo kale oo la heli karo sida:

- Aqoonsiga shaqada;
- Aqoonsiga kaarka dusgiga;
- Kaarka caafimaadka (ma aha kan Medicare)
- Aqoonsiga ciidamada gaashaandhigga; ama
- Ceymiska dhaxalka.

***Aqoonsiyada oo dhan waa in ay noqdaan asalkii ama nuqul laga soo shaabadeeyey hay'adda soo sartay. Ma ogolaaneyno nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari)***. Waxaa laga yaabaa in aan hal qoraal ama aqoonsi u adeegsano labo ujeeddo. Tusaale ahaan, waxaa suurogal ah in aan baasaboorkaaga u adeegsano aqoonsi ahaan iyo caddeyn dhalashada ah. Ama, aan u adeegsano shahaadada dhalashada caddeyn da'da iyo dhalashada. ***Hase yeeshee, waa in aad keentaa ugu yaraan laba aqoonsi.***

Boostada ayaa laguugu soo dirayaa lambarkaaga iyo kaarka sida ugu dhaqsaha badan ee aan u helno macluumaadka oo aan ka xaqiijino aqoonsiyadaada xafiiska soo saaray.

## Maxaa dhacaya haddii ilmaha aan korsanayo?

Waanu siineynaa lambarka ilmaha aad korsaneyso ka hor inta aanay dhamaan warqadaha sharciga ah, but laakiin waxaa laga yaabaa in aad sugto. ka dib, waxa aad codsan kartaa lambarka adiga oo isticmaalaya magaca cusub ee ilmaha, adiguna aad waalid ahaan ugu qoran tahay. Haddii aad dooneyso in aad sheegato ilmahaagasi aad canshuurta uguX xareysato inta aanay dhamaan waqradaha ogolaashaha korinta, la xiriir Waaxda Canshuuraha adiga oo buuxinaya foomka codsiga lambarka ku meel gaarka ahFoomka W-7A, *Codsiga Lambarka Cabshuur Bixinta ee sugaya dhaqangelinta Mareykanka (Application for Taxpayer Identification Number for Pending U.S. Adoptions)*.

## Waa imisa kharashka aan bixinayo?

Wax lacag ah lagaama doonay si aad u codsato kaarka iyo Lambarka Bulshada. Haddii uu qof kula soo xiriiro oo uu doonayo inuu lacag kaaga qaado codsiga helitaanka lambarka ama kaarka, xusuusnow in adeegga Lambarka Bulshada uu



*(rogad)*

yahay mid lacag la'aan ah. Cid kasta oo isku dayda in ay lacag kaaga qaataan waa in aad la socodsiisaa Xafiiska Dambibaaraha Guud ee **1-800-269-0271** (TTY **1-866-501-2101** dhagool ama maqal adag) laga bilaabo 10:00 saacadood. ilaa 4:00 p.m. Waqooyiga Bari ama booqo ***http://oig.ssa.gov/report***.

## Maxaan yeelayaa haddii kaarku iga lumo?

Waxa aaf weydiisan kartaa kaar kale oo laguu sameeyo haddii uu kaa lumo ama lagaa xado. Sanadkii sadex jeer oo kaliya ayaad bedeli kartaa ama 10 jeer inta aad nooshahay. Magaca oo qofka iska bedelo ama xaaladaha qaarkood lama xisaabayo. Tusaale ahaan, isbedelka xaga sharciga ah ee ku yimaada dadka aan dhalashada heysan oo waajibka ayey ku tahay in ay kaar cusub qaataan laguma xisaabayo tirada ay bedelan karaan. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in aanay saameyn kugu yeelan haddii aad caddeyn karto in aad ugu baahan tahay kaarka xaalad adag oo kula soo deristay darteed.

Kaarka Lambarka Bulshada ee Ilmahaaga waa muhim Waxaanu kugula talineynaa in aad si adag u ilaaliso Ha ku qaadin jeebka ama boorsada.

## Qalad U Isticmaalka lambarka Bulshada (SS)

Haddii aad tuhunsan tahay in qof uu isticmaalayo Lambarka Bulshada ee ilmahaaga si been abuur ah, waxa aad cabasho ka diiwaan gelin kartaa dawladda dhexe ee cinwaanka:

- Internetka — ***www.identitytheft.gov***;
- Telefoonka — **1-877-IDTHEFT** (**1-877-438-4338**); ama
- TTY — **1-866-653-4261**.

Waa arrin sharci jabin ah:

- Isticmaalka Lambarka Bulshada ee qof kale;
- In sheegto macluumaad been ah marka ad codsaneyso lambarka; ama
- Aad bedesho, iibsato ama gaddo kaarka Lambarka Bulshada

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa

(rogad)

aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10023-SO | December 2017
Lambarka Bulshada ee Caruurta
Social Security Numbers For Children (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha